



UJEEDO: HESHIIS KALA GADASHO GURI DHISAN OO JIINGAD AH "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **13/03/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiiska ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheynt ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

ISKA IIBIYE:- Maxamed Sh.Cali Xuseen Caraale, Hooyo: Dahabo Axmednur Jamac, Somali ah, Ku Dhashay: G/kacyo, Sanadkii: 1983, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P00726783	IIBSADE:- Cilmi Geedi Tooxow Afrax, Hooyo: Xabiibo Afrax Cumar, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1964, Degan Muqdisho
TILMAAMAHA GURIGA LA KALA IIBSANAAYO Guri Dhisn oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Hodan), Cabirka: (20X15)-M, Looto No: 478-FG , W.M.L: (15643/2020), Tr. 19/01/2020, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Maxamed Cali Nuur (Socdaal)	SOOHDINTA GURIGA Bari: Dhul dad, Koonfur: Jid , Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Dhul dad QIIMAHA GURIGA: USD \$17,500 (Toban Iyo Toban Kun Iyo Shan Boqol Oo Doolarka Mareykanka ah).

B- Aniga oo ah **MAXAMED SH.CALI XUSEEN CARAALE**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey **CILMI GEEDI TOOXOW AFRAX** Gurigayga dhisn oo tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in gurigaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Gurigaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaana Ka dhisn 3 Qol 1 Musqul Iyo Wareegooda Oo Jiingad Ah.Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **CILMI GEEDI TOOXOW AFRAX** Ahna Iibsadaha gurigaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkiyada Gurigaan Kuna qancay heshiiskan.

J- Anaga oo Kala ah Axmed-Haadi Sh. Cali Xuseen & Cumar Sh.C/casiis Sh. Ibraahim Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecan.

X- ASALKII HORE: Cumar Isloow Maxamuud Cadow RL:- 11843, Tr. 14/09/2003, Sabarlog No: 142/26/2003, Tr. 15/09/2003, Kana Soo Wada Baxeen D/Hoose Ee Muqdisho Cabirka (120X40)-M Looto No 472 ilaa 487-FG.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHGA GURIGA

MAXAMED SH.CALI XUSEEN CARAALE

SAXIIXA IIBSADAHGA GURIGA

CILMI GEEDI TOOXOW AFRAX

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- AXMED-HAADI SH. CALI XUSEEN

2- CUMAR SH.C/CASIIS SH. IBRAAHIM

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 608/T.P.N/23, Tr. 13/03/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Maxamed Sh.Cali Xuseen Caraale** Ahna (Iska iibiye), **2- Cilmi Geedi Tooxow Afrax** Ahna (Iibsade) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

✓ Sayid




NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

(Handwritten signature of Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo")

IIBIYE:MAXAMED SH.CALI XUSEEN CARAALE



IIBSADE:CILMI GEEDI TOOXOOW



(MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA)

MARAG:AXMED-HAADI SH.CALI XUSEEN



MARAG:CUMAR SH.C/CASIIS SH.IBRAAHIM





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2023 - TRS-163359



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqseysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

478-FG

TITLE DEED NO

W.M.L.(15643/2020) TR 19/01/2020

DEGMADA

Hodan

CABIRKA

20X15-M

CIDDA WAREEJINEYSA

MAXAMED SH CALI XUSEEN

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

CILMI GEEDI TOOXOW AFRAX

NOTARY

NOOTAAYO TAYO

NOTARY REF

608/T.P.N/23

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$17,500.00

Taariikda la bixiyey:

16/03/2023 00:00:00



TRS-
163359

Waaxda Canshuuraha Barriga





UJEEDO:- HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN

L.15643/2020

Tr.19/01/2020

Sanadka Labada kun iyo labaatanka Maalinta 19-ka Janaayo 2020 (19/01/2020) Anigoo ah Dr. Maxamed Cali Nuur (Socdaal) Xafiiska Nootaayaha Muqdisho, Xafiisna ku leh Wadada H/wadaag ee Degmada H/wadaag inta u dhaxeysa Shirkadda Isgaarsiinta Hormuud iyo Masjidka Abuu Hureyra, waxaa iigu yimid iyagoo heshiis ah dadka kala ah:

1) Maxamed Shiikh Khaliif Cumar ina Dahabo Macalin Xuseen ku dhashay Kismaayo sanadkii 1962 degan Xamar lehna Baasaboer No.P00451169/Soomaaliya, sitana Wakaalad L.B173/89616/2019 Tr.28/12/2019 kana soo baxday xafiiska Nootaayaha Banaadir Timacadde uuna saxiixay Dr. Cabdiraxmaan Maxamuud Cali (Timacadde) ahna Wakiil iskagade...2) Maxamed Sh. Cali Xuseen Caraale ina Dahabo Axmed Nuur ku dhashay Gaalkacyo sanadkii 1983 degan Degmada Yaaqshiid ahna iibsade.....Ugu horeyn dadkaasi waxay i weydiisteen in aan u kala qoro heshiis ku saabsan kalagadasho dhul ku yaal degmada Hodan lehna W.M.L.55716/2014 Tr.30/07/2014, kana soo baxday Xafiiska Nootaayaha Muqdisho uuna saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble **Lotto L.476 ilaa 479/FG**, cabirkiisuna dhan yahay **(40X30M)** ahna dhul banaan soohdimihiisuna kala yihiin: **Koofur jid**=====**, Waqooyi jid**=====**, Bari dhul dad, Galbeed dhul dad**, Maxamed Shiikh Khaliif Cumar wuxuu qoraalkaan ku cadeynayaa in uu ka iibiyey kuna wareejiyey Maxamed Sh. Cali Xuseen Caraale **dhulka uu ku qoran yahay Bankiga Salaam Ee Soomaaliya (Salaam Somali Bank)** oo ku yaal degmada Hodan cabirkiisuna dhan yahay **(40X30M), Lotto L. 476, 477, 478, 479/FG** Koofur jid Waqooyi jid, inta kalana dhul dad, sidaa darteed milkiyadii dhulkaas waxay ku wareegtay ninka iibsaday oo ah: **MAXAMED SH. CALI XUSEEN CARAALE**, Maxamed Shiikh Khaliif Cumar wuxuu kaloo qoraalkaan ku cadeynayaa in dhulka uu leeyahay Bankiga Salaam Ee Soomaaliya (Salaam Somali Bank) ee uu iibiyey ka madax banaan yahay rahan iyo sheegasho dad kale waxayna ku heshiiyeen oo ku kala iibsadeen lacag dhan **U.S.\$38,127.10**=(SODON IYO SIDeed KUN BOQOL LABAATAN IYO TODOBO IYO TOBAN SENTI OO DOOLAR AMEERIKAAN AH) oo loo shubay Bankiga Salaam Ee Soomaaliya (Salaam Somali Bank), wixii ka yimaada milkiyada dhulkaasi oo sheegasho dad kale ah waxaa mas'uul ka ah Bankiga Salaam Ee Soomaaliya (Salaam Somali Bank) wixii aan ku xusneyn halkaan waxaa loo raacayaa sida uu qabo sharciga Jamhuuriyadda Soomaaliya, heshiiskaasina sidaasi ayuu ku dhamaaday markii ay aqristeen dhinacyadu oo ay wada fahmeen ayeyna halkaan hoose wada saxiixeen.

Wakiil iskagade: Maxamed Shiikh Khaliif Cumar Max Sh. Khaliif Cumar

Iibsade: Maxamed Sh. Cali Xuseen Caraale Maxamed Sh. Cali Xuseen

Marag: Xuseen Cusmaan Maxamed Xuseen Cusmaan Maxamed

"": Cabdi-nuur Macalin Cali Xasan Cabdi-nuur Macalin Cali Xasan

Waa loo dhawr galyey
Waa na loo magac
waxa jiray

NOOTAAYAHA
MUGADISHU PUBLIC NOTARY OFFICE
SOMALIA
MUGADISHU-SOMALIA
CALI NUUR (SOCDAAL)





Wakiil iskagade

Maxamed Shiiikh Khaliif Cumar ,



libsade

Maxamed Sh. Cali Xuseen



Marag

Xuseen Cusmaan Maxamed,



Marag

Cabdi-nuur Macalin Cali Xasan

Waxaa laibsaday
20X15/11/2022 476-FG
REPNO = 39246/2022
TR = 23/05/2022

REPNO 15475-020
TR 1-3-020
20X15
Cotto 477-FG

REPNO = 77238/21
MOTH (20X15)-M
Cotto (479) TR-05/05/21



Becc
R-608/T.P.N/23
TR 13/03/23
20X15-M
Cotto 478-FG

Computer ID
0011169



LAMBAR BOONADA 001-0000030565
LACAGTA: 50.00

**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU**

WARAQAADDA DIIWAANGALINTA KALA WAREEJINTA DHULKA

Date Issued 03-Mar-2020

Dowladda Hoose ee Muqdisho waxey diiwaangalinasay Becca lambarkiisu yahay

REF-NO.15643

Taarikh

03-Mar-2020

Booska lotto no

476-479.FG

Cabirkisuna yaha

40 X 30-M

Kuna yaala Degmada

Hodan

Kana soo baxay Nootayda

Maxamed Cali Nuur (Socdaal)

Kuna wareegay

MAXAMED SH. CALI XUSEEN CARAALE

Kana wareegay

MAXAMED SH.KHALIIF CUMAR

Asalka: Magaca loo cabiray:

CUMAR ISLOW MAXAMUUD CADOW RL:-11843 TR:-14/9/2003 SABARLOG-NO
B.142/B.26/2003 TR:-15/9/2003 D/H/X CABIRKA-120 X 40-M LOTTO-NO 472 ILLAA
487.FG



Duqa Magaalada ee Muqdisho

Mayor of Mogadishu

Cumar Maxamuud Maxamed





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
BENADIR TIMA ADDE PUBLIC NOTARY OFFICE

Ujeeddo: Wakaalad Gaar ah, **Date:** 28/12/2019
Muqdisho Maanta oo ay taariikhdu tahay 28/12/2019 Anigoo ah ah Xasan Jaamac Cawaale lehna (Basporka warqadaan ku lifaaqan) **ahna Maamulaha Guud** Salaam Somali Bank isla markaasna kana caafimaad qaba wax allaale iyo wixii wax u dhimi karaya maskaxda iyo jirka bini'aadamka cid i qasabtayna ay san jirin qowl iyo ficilba. Waxaan halkaan si buuxda ugu caddeynaa in Salaam Somali Bank wakaalad Gaar ah siisay Madaxa Xiriirka Macaamiisha **Maxamed Sheikh Khaliif Cumar** waxuuna u wakiishay oo awood buuxda u siiyay in uu Warejiyo Dhul Salaam Somali Bank muraabaxeeeyo ku waasoo qiimahooda kayar yahay **\$150,000** (Boqol iyo konton kun oo dollarka mareykanka ah) mudo 3-bilood ah oo ka bilaabanaysa 28/12/2019 kuna eg 28/02/2020 Waxaan wakaaladaan gaarka ah bixiyay anigoo ka caafimaad qabo maskaxda iyo jirkaba cid i qasabteyna aysan jirin qawl iyo ficilba.

Awood Bixiye

1. Xasan Jaamac Cawaale

Aniga oo ah Maxamed Sheikh Khaliif Cumar, waxaan caddeynayaa in aan Aqbalay wakaaladda uu ii Wakiishay Salaam Somali Bank.

Wakaalad Aqbale: Maxamed Sheikh Khaliif Cumar

Marag

1. C/risaaq Cumar Faarax

2. C/nuur Cali Xasan

Xafiiska Nootaayo Banaadir
Saxiixa la Sugay

Ref: B173/89616/19

Date: 28/12/2019

Anigoo ah xafiiska nootaayo banaadir Dr.C/raxmaan Maxamuud Cali (timacadde) ku yaal degmada wadajir agagaarka Km4 waxaan sugayaa in saxiixyada sare ku qoran ay yihiin Kuwii dhabta ahaa ee Awood bixiye Xasan Jaamac Cawaale & wakaalad Aqbale Maxamed Sheikh Khaliif Cumar, iyo markhaatiyaasha 1.C/risaaq Cumar Faarax 2.C/nuur Cali Xasan waxayna ku saxiixeen xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina Qasbin, kadib markii ay iska akhriyeen waxaan ku qoray diiwaanka guud ee Nootaayadda.

By.Abdinour

Xafiiska Nootaayo Banaadir
Dr:C/raxmaan Maxamuud Cali (Timacadde)



The Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the State Minister

Ref#: MOF/SM/0075/15

Date: 31/5/2015

Ku: Agaasimaha Waaxda Canshuuraha Berriga

Ku: Salaam Somali Bank

Og: Taliyaha hogaanka Ilaalada canshuuraha iyo dakhliga

Og: Xisaabiyaha Guud ee dowladda

Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda

Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Uj: Habka Canshuuraha Maalgelinta Bangiga Salaam Somali Bank

Aniga oo tix raacaya waraqadda katimid Bangiga Salaam Somali Bank sumad SSB/IMO/0010/2015. TR. April 8 2015. oo ay kaga cabanayaan canshuurta diiwaan gelinta iibka iyo heshiiyada maal gashiga bangiga Salaam Somali Bank,

Waxaa lala socodsiiyaa dhammaan hay'adaha dowlada sida wasaaradda maaliyadda, ciidanka ilaalada canshuuraha iyo dakhliga iyo ciddi kale oo ay khusaysaba in loo canshuura sida uu sharcigu qabo lagana qaado hal canshuur oo kaliya

Bangigu waxaa uu maalgeliyaa mashaariic kala duwan waxaana lagu qorayaa badeecada ama hantida magaca bangiga si loo hubiyo amaanada maadaama bangigu ku shaqeyo hab islaami ah waana in laga qaado canshuurta ku waajibtay balse marka qofka ama shirkadda loo sameeyay maalgelinta oo ay iska bixiyaan lacagti maalgashiga waxaa lagu wareejinayo qofka ama shirkadda hantida leh lagamana qaadi karo canshuur labaad waayo hantida ama badeecadu magelin kala iibsi kale ama labaad.

Mahadsanid

Cabdullaahi Maxamed Nuur

Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Maaliyadda

Ahna Kusimah Wasiirka Wasaaradda

Cabdullaahi Maxamed Nuur



Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya

FIISKA NOOTAAYAHA IYO LATALINTA
SHARCIGA EE MUCALLIM

Muqdisho-Somaliya Tells:

+252 615500179, 0615591147, 0615532228

Email: notayomucallim@gmail.com



مركز معلم للاحتشادات الشرعية
ORIGINAL
مقدشو - الصومال هاتفنا:

+252 615500179, 0615591147, 0615532228

البريد الالكتروني: notayomucallim@gmail.com

Ref: XNLSHM/0009/2016

Date: 29/8/16

Ujeeddo: Dhisme Shirkad Ganacsi

Maanta oo ay taariikhdu tahay 29/08/2016 waxaa xafiiskayga Nootaayaha Mucallim horyimid ayaga oo heshiis ah, cid la khasbayna aanay jirin, Maanka iyo Maskaxdana ka fayow, dadka ay magacyadoodu hoos ku qoranyihiin, waxaayna iweydiisteen in aan u qoro Heshiis cusboonaysiin ah kuna saabsan Shirkad ganacsi oo ay wadaleeyihiin, taasoo sharci ahaanna ku bannaan sida uu Allaah Qur'aanka noogu sheegay: ﴿فَإِنْ كُنْتُمْ أَحْتَرُونَ مِنْ تِلْكَ فُهُمْ شُرَكَاءُ فِي التُّكْلِ﴾ Suuratu Alnisaa', Aayadda 12, islamarkaana uu tilmaamay Rasuulkeenna Muxammad SCW, markii uu yiri:

"يقول الله تعالى: أنا ثالث الشريكين ما لم يخن أحدهما صاحبه، فإذا خان أحدهما صاحبه خرجت من بينهما". أخرجه أبو داود من حديث أبي هريرة وصححه الحاكم

Isla markaana uu ogolyahay Xeerarka Ganacsi ee dalkeena sida ku cad Xeer Lambar 204 ee soo baxay 29 Sep 1964 ee dhismaha Shirkad ganacsi & Sharci lambar 37 ee 2/Jun/1973 ee xeerka madaniga Soomaaliyeed Qodob 502.

Haddaba ayada oo uu qoraalka wada socdo waxa uu nuxurka heshiiska qoraalka cusboonaysiinta dhismaha shirkaddani u dhacay sida soo socoto:

Annagoo kala ah:

1. Salaam Investment Co. (waxaa u saxiixaya Cabdirashiid Cali Jimcaale)
2. Maxamed Axmed Cali
3. Cabdirashiid Cali Jimcaale
4. Cabdicasiis Yuusuf Diini
5. Maxamed Aadam Faarax

Waxaana ku heshiinay qodobada hoos ku qoran:

Qodobka Kowaad: Magaca Shirkadda

Magaca Shirkaddu waa: (Shirkadda ka Ganacsiga Dhulka ee Daarusalaam Properties Company).

Qodobka Labaad: Nooqa Shirkadda

Waa shirkad ganacsi ee Xaddidan taasoo ay leeyihiin dad Soomaaliyeed oo isugaystay hantidooda.

Qodobka Sadaxaad: Xarunta shirkadda

Xarunta Shirkaddu waa Magaalada Muqdisho ee ah Caasimadda Soomaaliya, waxa uu xafiiskeeda weyn ku yaalla Suuqa weyn ee Bakaaraha, E-mail darusalamproperties@gmail.com.

Qodobka Afaraad: Aasaaska Shirkadda

Shirkaddan waxaa la aasaasay 2009, waa shirkad horey u shaqeyneysay, laakiin hadda loo cusboonaysiinaayo, taasoo keentay in la qoro caqdigan cusub lana marsiiyo nootaayo.

Qodobka Shanaad: Ujeeddada Shirkadda

Ujeeddada Shirkaddu waa ka ganacsiga iyo horumarinta dhulka deegaanka Daaruslaam (Ex Rati weyne) si loo sameeyo faa'iido ku salaysan xalaal, loona degaameeyo dalka.

Qodobka Lixaad: Maalgalinta shirkadda

- A) Maalgalinta Shirkadda ee la isugeystay waa USD 3,267,626.8 (Saddex Malyan Laba Boqol Lixdan iyo Todoba Kun Lix Boqol Labaatan iyo Lix dhobic Sideed sinti)
- B) Saamiyada sida loo kale leyahay waxa ay ku qoran tahay xeer hoosadka Shirkadda.






Qodobka Todobaad: Qaabdhismeedka Maamulka Shirkadda

1. Qaabdhismeedka maamulku waa gole haggis (board of directors) oo ah cida ugu saraysa shirkadda kana kooban shan xubnood, waxayna isla garteen inuu gudoomiye u noqdo shirkadda Cabdirashiid Cali Jimcaale Isaga ayaana magacaabaya xubnaha kale ee maamulka fulinta iyo wakiilada shaqaynaya.

Qodobka Sideedaad: Waqti xisaabeedka Shirkadda

Waxaa xisaabta la xirayaa sannadwalba bisha December daba yaaqadeeda (31 Dec), iyadoo la raacayo habxisaabeedka GAAP (Generally Accepted Accounting Principles).

Saxiixyada dadka Heshiiska Galay

1. Salaam Investment Group 
2. Maxamed Axmed Cali 
3. Cabdirashiid Cali Jimcaale 
4. Cabdicaziiz Yuusuf Diini 
5. Maxamed Aadan Faarax 

Nootaayo Mucallim

Dr. Cabdi Aadan Mucallim Cabdulle





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:- (HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNICIPALAAL AH).

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay Sodonka Bisha July, ee Sanadka Labo kun toban & Afarta (30/07/2014.) Aniga Nootaaya Muqdisho Dr. Saciid Cali Cosoble waxaa Xafiiskeyga kuyaal S/Bakaaraha ee inta u dhaxaysa Shirk.D/shiil & Masjidka Abuu Hureyra iigu yimid iyaga oo soo heshiiyey ina weydiistey inaan u kala qoro heshiiskooda ujeeddada sare ku xusan dadka Soomaaliyeed ee hoos ku kala caddeynaya sidatan:-

1-) Aniga oo ah Axmed Xuseen Sheekh Maxamed Macalin Xuseen, Waxaan heshiiskan ku cadeynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyey kuna wareejiyey Salaam Somali Bank, uu wakiil u yahay Axmed Faarax Fiidoow, dhulkayga banaan ee ku yaal Xamar Degmada (Hodan) "Garasbaaleey" Dhulkaas oo aan ku Milkiyey W.M.L.02943/2012, Tr,15/9/2012, Kana Soo Baxdey Nootaayo Muqdisho uuna Saxiixay Dr,Maxamed Cali Nuur,Dhulkaas oo Cabirkiisu dhan yahay (40X30.M).Lotto.Lr.(476 iLaa 479-FG). Soohdimihiisuna kala yihiin Koofur iyo Waqooyi Jidad. inta kalena waa dhul dad. Wuxuuna Wakiilka Salaam Somali Bank Dhulkaan iiga iibshay lacag dhan USD. **29,000/\$**(Sagaal iyo Labaaatan Kun oo Dollar oo Lacagtaas dhamaanteed aan wada qatey). Waxaan kale oo aan cadeynayaa in Dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan,xuquuq ama sheegasho cid kale iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla Dhulkaan. Waxii taariikhda sare ka bilowdana dhulkaan milkiyadiisa Faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa Canshuureedba wuxuu u wareegay (Salaam Somali Bank uu Wakiil u yahay "Axmed Faarax Fiidoow")

2-) Aniga oo ah Axmed Faarax Fiidoow, ahna Wakiilka Salaam Somali Bank, uga wakiilka ah heshiiskan Waxaan heshiiskan dhankayga ku cadeynayaa in Axmed Xuseen Sheekh Maxamed Macalin Xuseen uu igu wareejiyay afarta dhinac ee kala duwan ee dhulkaan uu Salaam Somali Bank ka iibiyey ee uu sare uga soo hadlay lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan anigu u gudoomay Salaam Somali Bank una saxiixay kaalinta Banka heshiiskan.

=SAXIIXA ISKA IIBIYAHA=

Axmed Xuseen Sheekh Maxamed Macalin Xuseen.

=SAXIIXA WAK/ S. S. BANK=

Axmed Faarax Fiidoow.

Ahmed

=(SAXIIXYADA MARKHAATIYAASHA)=

1-) Cali Xasan Cali.

2-) C/laahi Maxamed Jeyte.

Rep.55716/2014

(**CADDEYNATA NOOTAAYAHA**)


Tr.30/07/2014.

Aniga Nootaaya Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble waxaan cadeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) Axmed Xuseen Sheekh Maxamed Macalin Xuseen, Somali ah, Hooyadiisna layiraahdo Faadumo Sheekh Cabdi, ku dhashay Afgooye, Sanadkii 1977, Kii, Sita Somali Passport Lr. P00266913, ahna (iska iibiye). 2-) Axmed Faarax Fiidoow, oo ah (Wakiilka Salaam Somali Bank). iyo waliba labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan. Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadas ayleeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska, iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

By. Madaxey.

=NOOTAAYAHA=


(Dr. Saciid Cali Cosoble)



*Wada shi waan gah yaly
waana loo magac ah
wax ee ku yaly*



قيد و جاز
الاصحاح 11



JAMHUURIYADDA
SOMALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDO: (HESHIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNICIPALAAL AH)
Mudishe, maanta oo taariikhdu tahay Sebdoonka Bisha July ee Sanadka Labo kun toban & Afaha
(30/07/2014) Aqoosa Nootaaya Mudishe Dr Saaid Cali Cosoble waxaa Xafiiskayga ku yaal 2/Bakarta ee
inta u dhaxaysa Shirk Dahiil & Masiidka Abuu Hurayr iigu yimid iyadoo soo heshiyeey inta weydistey
maanta u kalsoore heshiiskaada ujeeddada ee ka xusan baska Soomaalida ee hoos ku keba

1- Aqoosa oo ah Axmed Xuseen Sheekh Maxamed Macalin Xuseen Waxaan heshiiskan ku
caddaynayaa aqoosa oo xis dagaal in aanka iibiyey kuna wareejiyey Salaam Somali Bank oo wakili u yahay
Axmed Farax Fiiqow, dhulkayga banaan ee ku yaal Xamar Dajirada (Hoban) "Garaasbeey"
Dhulkas oo aan ku Milkiiyey W.M.L.02432012, T.1512012, Kana 2/0 Bakday Nootaaya Mudishe
nuna Saxiixy Dr Maxamed Cali Nuur/Dhulkas oo Cabdikaan dhari yahay (40X30M) Loto LT (476 I.3a
479-Fg) Soobimbiisuna ka yimid Kooriyi/Wadanyi Jidab inta kaama wa dhul dhad Wixuna
Waklika Salaam Somali Bank Dhulkariga iidsay lacag dhan USD 29,000\$ (Sagaa iyo Labaat
kun oo Dollar oo lacagtaas dhamaanteed aan wada deley) Waxaan kale oo aan caddaynayaa in
Dhulkan uu ka madax banaan yahay tahaan xuduud ama sheegasho cid kale iyo wax kasta oo horjoogan
kara heshiiskan isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii caddaalat milkiiyadeed ah ee la
xira isla Dhulkan Waxii laanikida sare ka biowdana dhulkan milkiiyada Faa'iidaasi iyo
wajibaadkisa Canshuureedba wuxuu u wareegay (Salaam Somali Bank oo Wakili u yahay "Axmed

Ref L 15643/2020
T 19/01/2020

Cabu 40x30

Lote L 476 I.3a 479/Fg



Sanadka labadkunlabaiyo Tobanka Maalinta 15ka Septemner 2012

~~(15/9/2012)~~ Anigoo ah Dr. Maxamed Cali Nuur Xaafiiska Nootaayaha

Muqdisho, Xaafiisnaku leh WadadaH/Wadaag eeDegmada H/Waddaag, inta

u dhaxeysa Shirkade Igaarsiinta Telecom Somaliye iyo Shirkade

Xawaalaada Dahabshiiil waxaa iigu yimid iyagoo heshiis ah dadka

kalaah 1) Cumar Isloow Maxamud Caddow ine Xaawa Xasan Maxamed ku

dhashay Xamar sanadkii 1967 degan Degmada Hodon (Garas- Baaley)

Sawirkiisuna ku dhegen yahay Aayadaan dusheeda uunadamiin Aqoonsi

ka yahay Mudane Cumar Cali Shuuceyb Sawirkiisunaku dhegen yahay

AAtadaan dusheeda laganayaqaan Xaafiiskaan, ahna iskagadae.....2)

Axmed Xuseen Sh. Maxamed Mac Xuseen ina Faadumo Sh. Cabdi Sh. Cumar

ku dhashay Afgoye sanadkii 1977 degan Degmada Dahrkeynley

ugu horeyn dadkaasi waxay i weydiisteen in aan u kalaqoro heshiis

ku saabsan kalagadasho dhul ku yaal Degmada Hodon lehne W.L.DH/B/B/

142/26/2003, Tr.15/9/2003, W.L.Q.11843, Tr.14/9/2003 D.H.X.Lotto NO.

476 ilaa 479/FG, Cabirkiisuna dhan yahay (30X40 M) ahadhul banaan,

Sohdimihiisunakalayihiin Kof; Jid,====||====, waq. Jid,====

Bari dhul daa, Gal. dhul daa, Cumar Isloow Maxamud Caddow Wuxuu

qoraalkan ku cadeynayaa in uu kaibiyey kunawareejiyey Axmed Xuseen

Sh. Maxamed Macalin Xuseen dhulkiisa banaan ee ku yaal Degmada Hodon

Cabirkiisuna dhan yahay (30X40 M) Lotto NO.476 ilaa 479/FG, Kof; Jid,

Waq. Jid, intakalanadhul daa, sidaas darteed Milkiyadii dhulkaasi

waxay ku wereegtey ninkaiibsadey ooah AXMED XUSEEN SHEEKH MAXAMED

MACALIN XUSEEN ; Cumar Isloow Maxamud Caddow Wuxuu qoraalkan ku

cadeynayaa in dhulkaasi uu iskaibiyey kamadax banaan yahy rahan iyo

sheegasho dadkale, waxayna ku heshiiyeen oo ku kalaiibsadeen lacag dhan

U.S.\$,9000/= (sagaalku n Doclar) oo gaarantalegeesaa saarey iskagadagaha

wixii kayimeed Milkiyada dhulkaasi oo sheegasho dad kale ah waxaa

masuul ka ah is gadaha, wixii aan ku xusneyn halkaan waxaa loo raacayaa

sida uu qabo Sharciga Jamhuriyada Soomaaliye, heshiiskaasina sidaas

ayuu ku dhamaadey, markii ay aqristeen dhinacyadu oo ay wada fehmeen

ayeynahalkaan hoose wadasaxiixeen.

Iskagede; Cumar Isloow Maxamad Caddow

Damin Aqoonsi; Cumar Cali Shuceyb

Ihsade; Axmed Xuseen Sh. Maxamed Mac. Xuseen

Marag: MAXAMED Shuqaale Maxamed

" " Salaad Axmed Cali

Gabdi Ismail Ibrahim Maxamed



Rep=55716/2014

N. 30/7/2014

U-DH (40 X 30 M)

totto 11/4761100 479-FG



797/2003

HODHA

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA

40x120 d. 472 w. 487 F4

Xaashida lacag Qabashada No.: _____

Mud / Mar. Cumar Isleem Maxamed

Waxaan ka qabtay Sh. So. 4,800,000.00 18 per

Mulkiyada ka qabta hadda

oo ah _____

Muqdisho _____

B-Qofka Lacagta Bixiyay
T-Maamulka Lacagta
J-Nuqul ku haraya Boloogga

14/9/2003



BEE

REF U155-019

HAER NT. 00015

for 12-1-013

20X 2012

Tr. 26/02/08

680 485,487-FA

40X30

1000 NT 471 470

120 PO 2943/012

10: 25/9/012

(40X30)

~~2: 2761-279/FA~~

- 4761/00-479/FA



**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA**

No.:

Soo Gelidda Warqadda

Tirsi :

Taariikh :



Bollettario No.:

Bolletta No. :

Sannadka :

142

26

2003

WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA

Mud / Mar.:

Cumar Islem Maxamed Cadow

Og.: Tal. Ciidaanka Boliska Dawladda Hoose Muqdisho

- Xamar.

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo oggolaady inuu / iney dhisto Cariish, Baraako ama

Guri Dhagax ah

120 X 40

oo uu ka dhiso cad dhul ah oo

le'eg

Deymo-bari

kuna yaal Xaafadda

Hodan

Soohdintiisuna tahay

1-472 ilka

X. Woqooyi

X, Galbeed

X, Bari

487-FG

iyo Koofur

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maanta

Ka billaabmanta, fasaax la'aan inaad dhulka dhistid.

Warqadda la'aag qaabashada No.

11843

ee

14-9-2003

Muqdisho, Taariikh

15-9-2003

Agaasimaha Waaxda Dhulka



Duqa Magaalada

20 MAR
- 20
M...
8/9/04

12000243/412
11.15/9/02
100x30

Becc
- late NT-00015
Tr. 26/08/02
40x30
1000 NT 472-475

~~2776~~ ~~100~~ ~~477/6~~

76, low
470/6

Rep 4155-013
for 12-1-013
20x30m
640 485, 487-15




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 20/03/2023

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Cabdulwaduud Cilmi Geedi Tooxow** oo ka Wakiil ah Iibsade **Cilmi Geedi Tooxow Afrax** Dukumiintiga **Original+Aato** Beeca Guriga ee **Rep No. 608/W.P.N/23, Tr. 13/03/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Iibsadaha	Cilmi Geedi Tooxow Afrax
Cabirka	20X15
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	478-FG
W.M.L	15643/2020, Tr. 19/01/2020 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Beeca	13/03/2023
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Wakiilka Iibsade: Aniga oo ah **Cabdulwaduud Cilmi Geedi Tooxow**, Leh Tel No. **0619013740**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Guriga faah faahintiisu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Cilmi Geedi Tooxow Afrax**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Cabdulwaduud Cilmi Geedi Tooxow